

JEF-056-410

Rev. 12-20

Bogga 1 ee 1

Barwaalo-Sooranta Kentucky
 Maxkamadda Cadaaladda
www.courts.ky.gov
 KRS 431.078; RCr 8.08



**GUILTY PLEA AND
JUDGMENT
(MISDEMEANOR)**

**QIRASHADA IYO
XUKUNKA DEMBIGA
(DEMBI SAHLAN)**

Lam. Kiiska _____

Maxkamadda DegmadaGobolka Jefferson

Waaxda _____

BARWAALO-SOORANTA KENTUCKY

IYO.

DACWOODAHA

EEDAYSANAHA

1. Ma fahantay eedeymaha lagugu soo oogay iyo qaababka suurogalka ah ee aad isaga difaaci karto? Haa Maya
2. Ma rabtaa inaad qirato dembiga? Haa Maya
3. Ma ogtahay inaad xaq u leedahay:
 - inaad aamusnato oo aadan dembiga qiran Haa Maya
 - inaad damaanad macquul ah hesho Haa Maya
 - maxkamad degdeg ah oo si daah-rogan xeerbeegti ay kuugu qabato halkaas oo xeer ilaaliyuu uu ku qasban yahay inuu u caddeeyo dembigaaga si aan madmadow lahayn Haa Maya
 - inaad su'aasho markhaatiyaasha kugu maraq kacaya Haa Maya
 - inaad u yeerato markhaatiyaal oo keento wixii caddeyn ah ee adiga gacan ku siin kara Haa Maya
 - inaad racfaan qaadato Haa Maya
 - oo marka aad qirato dembiga, waxaad ka tanaasulaysaa dhammaan xuquuqahan? Haa Maya
4. Hadda miyaad la sarkhaansan tahay khamri, doroogo, ama maandooriye? Haa Maya
5. Ma lagaa daweeiyay ama hadda ma lagaa daaweynayaa jirro dhimir? Haa Maya
6. Ma ogtahay inaad xaq u leedahay inaad hesho qareen? Haa Maya
7. Ma ogtahay haddii aanad awoodin qareen, mid ayaa laguu qaban doonaa? M/kh Haa Maya
8. Ma rabtaa inaad ka tanaasusho xaqa aad u leedahay in qareen laguu qabto? M/kh Haa Maya
9. Haddii aad leedahay qareen, miyaad ku qanacsan tahay tallada qareenkaga? M/kh Haa Maya
10. Miyuu jiraa qof kuugu hanjabay ama kugu qasbay inaad qirato dembiga ama ma kuu ballan qaaday wax uun aad ku qirato dembiga? Haa Maya
11. Ma waxaad u qiranaysaa dembiga adigoo og, mankaagu joogo, si ikhiyaarkaaga ah, oo rabitaankaaga xorta ah ku timid? Haa Maya
12. Ma waxaad ku qiraysaa Maxkamadda in aad gashay dembi(ga/yada) soo socda ee _____ ? Haa Maya
13. Ma la socotaa in tani ay noqon karto dembi ciqaab adag yeelan kara haddii mar kale la sameeyo? M/kh Haa Maya
14. Ma la socotaa in ay jiri karaan cawaaqib adag oo dheeraad ah oo ay keeni karto qirashada eedayntan, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn: masaafurin, mammuucida dawladda dhexe ee ka dhanka ah hayashada hubka ee kuwa lagu xukumo inta badan dembiyada rabshadaha qoyska, mammuucida helitaanka shatiyada xirfaddeed qaarkood, iyo kabida kharashka guryaha? Haa Maya
15. Ma ka war qabtaa in aad xareyn karto codsi ah in laga saaro eedayntan diiwaankaaga inta aad ka soo baxayso shuruudaha ku xusan Xeerarka Dib-loo-eegay ee Kentucky? Haa Maya

Eedaysanaha

Qareenka Eedaysanaha (haddii uu jiro)

Taariikhda: _____, 2 _____

Qirashada dembiga waxa la sameeyaa iyadoo xog-ogaal la yahay, maanku joogo, ikhiyaari ah, oo eedaysanaha rabitaankiisa xorta ah ku timid, **Maxkamaddu waxay aqbashaa qiraalka Eedaysanaha** ee eedaha uu Eedaysanuhu u qirtay dembiga. Taariikhdan **maxkamaddu waxay oggaatay** in eedaysanuhu uu **GALAY** eedaha kor ku xusan iyo/ama eedaymaha wax laga beddelay.

Garsoore

Qeybinta: Faylka Maxkamadda Eedaysanaha/Qareenka